# Haye, Dayrta!



Wargeyskan saddexdii biloodlaha ah oo ay soo saarto Washington State Department of Children, Youth, and Families (DCYF) waxaa loogu talagalay inuu la socodsiiyo kuwa la shaqeeya carruurta Washington, dhallinyarada, iyo qoysaska dhammaan shaqada weyn ee ku saabsan Horumarinta Xirfadeed.

---

# Wargayskan...

- PACE: Provider Accessible Community Equivalent (Wax U Dhigma Bulshada Uu Daryeel Bixiyaha Gaari Karo)
- Ilaha Da'da Dugsiga Hadda Waa La Heli Karaa
- Fursadda Waxbarashada Cusub ee La Ballaariyey: Goobaha Dhalinyarada Maamusho iyo Barashada Dareenka Bulshada
- Bixiyeyaasha Ku saleysan Dabeecadda Dibedda: Bogga Shahaadooyinka Hadda Waa Diyaar
- Cusboonaysiinta CPR
- Tababarada EQEL ee Sanadka 1 iyo 2
- Cusboonaysiin Laba Luuqadle ah
- Aasaaska Daryeelka Ilmaha oo Bilaash ah
- Laga Billabo Beerta illa Daryeelka Hore & Waxbarashada
- Codsiga Deeqda Xasilinta Daryeelka Carruurta Hadda Waa La Heli Karaa
- Barnaamijka Tababarayaasha iyo Tababarka ee Dawladdu Ansixisay
- Taxanaha Siminaarka Dayrta
- Nofeembar: La kulan oo Salaan iyo Isdhaafsiga Nooca Cuntada!
- Disembar: Daahfurka PACE
- Miyaad Seegtay Siminaarkii Oktoobar?
- Waxbarasho Ku Taageerida Xoogga Shaqada ee ECE
- Hagida Barnaamijka Deeqda Waxbarasho ee DCYF
- Deeqda Waxbarashada ee Early Achievers: Sheekooyinka Guusha
- Ka Qaybgalka Bulshada ee DCYF
- Cusboonaysiinta Qabiileed
- Calaamadayso Bogga Horumarinta Xirfadeed
- Rukumo Warsidaha PD
- Farriimo laga helay Xoghaynta DCYF

- Sidee Nahay?

# PACE: Provider Accessible Community Equivalent



DCYF waxay qabatay siminaar bishii Luulyo iyada oo la cusbooneysiiyay wax ku saabsan tababbarka DCYF ee u dhiganta bixiyeyaasha waxbarashada hore – oo hadda loo yaqaan PACE – Provider Accessible Community Equivalent.

Maxaa ku jiray Noocan PACE? Halkan taabo si aad u ogaato.

DCYF waxay la shaqeyneysaa Guddiga Gobolka Washington ee Kulliyadaha Bulshada iyo Farsamada si loo dejiyo hab lagu helo dhibcaha kulliyadda ee wadadan tababarka. Wax badan ayaa la heli doonaa horaanta 2022 oo ku saabsan shaqadan.

### SideeN U Bilaabaa PACE?

Bixiyeyaasha waxbarashada hore waxay dhammaystiri karaan Aasaaska Daryeelka Ilmaha (Child Care Basics, CCB) iyo Kobcinta Tayada Waxbarashada Hore (Enhancing Quality of Early Learning, EQEL). Si aad u hesho tababarada la heli karo, adeegso "bogga Find Training (Hel Tababar)" ee gudaha MERIT.

Qeybaha cusub ee tababarka PACE waxaa la heli doonaa Febraayo 2022.

Booqo websaydkasi ay ugu sii sugnaadaa ikhtiyaarkan u dhigma ee bixiyayaasha waxbarashada hore ee ruqsada haysta ee doorkooda ugu baahan shahaadada bilowga ah ama waq yar soconayso. Wixii su'aalo ah, la xiriir Diana Stokes.

# Ilaha Da'da Dugsiga Hadda Waa La Heli Karaa



Dugsiyadu waxay ku soo noqdeen hawshii waxayna ku bilaabeen mashquul!

Haddii ay dhacday inaad seegtay, Xeerka Maamulka Washington (Washington Administrative Code, WAC) 110-301 oo loogu talagalay bixiyeyaasha da'da dugsiga ee shatiga haysta ayaa si toos ah u dhaqan galay Juun 1.

DCYF waxay leedahay xoogaa ilo macluumaad ah si ay gacan uga geysato socodsiinta shuruudaha Horumarinta Xirfadeed ee cusub. Ilahaan ayaa hadda laga heli karaa bogga cusub ee Shahaadooyinka Shaqaalaha oo loogu talagalay daryeel bixiyayaasha da'da dugsiga. Boggaan, waxaad ka heli doontaa ilo sida:

- Shaxda Shahaadooyinka Shaqaalaha ee Guud
- Shaxda Shuruudaha Tababarka
- Ikhtiyaaraadka U Dhigma
- Iyo wax intaas ka sii badan!

Haddii aadan awoodin inaad si toos ah noogu soo biirto siminaarkii ku saabsanaa shahaadooyinka shaqaalaha da'da dugsiga, waxaad duubista ka daawan kartaa halkan.

---

# Fursadda Waxbarashada Cusub ee La Ballaariyey: Goobaha Dhalinyarada Maamusho iyo Barashada Dareenka Bulshada

Goobta Dhalinyarada Maamusho ayaa jebisa aragtida waxayna bixisaa xeelado Hawl gacameed ah oo lagu abuurayo barnaamij Fursad Waxbarasho oo Ballaaran oo xuddun u ah oo u dabbaaldega dhallinyarada.

Koorsadani waxay ku habboon tahay shaqaalaha dhallinyarada ah ee doonaya inay ku bixiyaan barnaamijyadooda nashaadaad ka jawaabis iyo ka qaybgal eh waxaana laga heli karaa goobta tababarka ee DCYF, fiiri!

Bogga Tababarka ee DCYF

---

# Bixiyeyaasha Ku saleysan Dabeecadda Dibedda: Bogga Shahaadooyinka Hadda Waa Diyaar



Heerka Daryeelka Carruurta ee Dabeecadda Ku salaysan ee Dibadda (The Outdoor Nature-Based (ONB) Child Care Touchstone Standards, ONB) hadda waa la heli karaa. Heerarkaan waxaa ka mid ah shahaadooyinka shaqaalaha oo ay tahay in loo buuxiyo barnaamijyadan.

Bogga gaarka ah iyo ilaha ayaa hadda loo heli karaa bixiyeyaasha ONB:

- Bogga Shahaadooyinka ONB iyo Shuruudaha Doorka
- Shaxda Shahaadooyinka Shaqaalaha ee Guud ee ONB
- Shaxda Shuruudaha Tababarka
- Waxbarashada iyo Ikhtiyaaraadka U Dhigma
- Iyo wax intaas ka sii badan!

**Ma xiisaynaya noqoshada barnaamijka daryeelka carruurta ee ONB ee ruqsad haysta?**

La xiriir: dcyf.welcome@dcyf.wa.gov.

---

# Cusboonaysiinta CPR



Bishii Luulyo 2021, DCYF waxay cusboonaysiisay shuruudaha tababarka CPR ee laga helay dukumintiga Wax ka beddelka Tababbarka ee Jawaabta COVID-19 (Ingiriis) (Isbaanish) (Soomaali).

Marka la eegoamarka maaskarada ee uu fuliyay Guddoomiye Inslee bisha Agoosto 23, 2021 iyo kiisaska COVID-19 ee kordhay, DCYF waxay sii wadi doontaa inay hakad geliso qaybta la soo xaadirayo ee looga baahan yahay tababarka CPR. Tan waxaa dib loo qiimayn doonaa Janaayo 2022.

- **Maxay tani uga dhigan tahay shaqaalaha jira (oo la shaqaaleeyay ka hor Maarso 2020)?**
    - Dhammaan shaqaalaha xanaanada caruurta ama shati bixiyayaasha oo kaarkooda CPR **ku cusbooneysiiyay** onlaayn ahaa intii u dhaxeysay Maarso 2020 illaa hadda:
        - Sug illaa taariikhda cusboonaysiinta CPR ee xigta si aad mar kale u samayso tababarka shaqsi ahaan.
        - Haddii taariikhdan cusboonaysiinta ay ka horeyso Diseembar 31, 2021,, tababarka CPR waxaa lagu cusboonaysiin karaa onlayn ahaan.
    - Dhammaan shaqaalaha xanaanada caruurta ama shati bixiyayaasha ku dhamaystiray kaarkooda CPR ee **ugu horreeya** onlaayn ahaan inta u dhaxaysa Maarso 2020 iyo hadda:
        - Dhammaystir qaybta tababarka CPR oo laga helayo daryeel bixiye la oggolaaday maadaama laga heli karo bulshadooda.
        - Haddii qaybta la soo xaadirayo aan laga helin bulshadooda waqtigan, qaybtan waa in la dhammaystiraa marka la helo.
    - DCYF waxay tan dib u qiimeyn doontaa Janaayo 2022.
- **Maxay tani uga dhigan tahay shaqaale cusub (oo la shaqaaleeyay wixii ka dambeeya Maarso 2020)?**
    - Shaqaalaha cusub ee la shaqaaleysiiyay waxay ku dhammaystiri karaan tababarkooda CPR onlaayn ahaan waqtigan.
- **Sideen ku ogaanayaa haddii tababarkeyga CPR uu buuxiyo shuruudaha WAC?**
    - Si aad u ogaato wax badan oo ku saabsan aqbalaadda iyo xaqiijinta tababarka CPR, dib u eeg Macluumaadka CPR/Gargaarka Koowaad ee Bixiyeyaasha Daryeelka Caruurta ee Shatiyeysan.
- **Goorma ayay DCYF bixin doontaa cusboonaysiin?**
    - DCYF waxay bixin doontaa cusboonaysiin horraanta 2022.
- **Haddii aan su'aalo qabo, yaan la xiriiraa?**
    - Wixii su'aalo ah oo ku saabsan arrintan, fadlan la xiriir shati bixiyahaaga DCYF.


---

# Tababarada EQEL ee Sanadka 1 iyo 2

Tababarada EQEL ee Sannadka 1 oo dheeraad ah ayaa hadda la heli karaa! Tababarradan waxaa lagu bixiyaa Ingiriis, Isbaanish, iyo Soomaali waxaana lagu heli karaa lacag la'aan. Waxaad ka raadin kartaa tababbarka EQEL adiga oo adeegsanaya "bogga Find Training (Hel Tababar)" ee gudaha MERIT.

## EQEL Sanadka 2 Goor Dhow Ayuu Bilaabmi doonaa!

Toddobaadyada soo socda, waxaad awoodi doontaa inaad raadsato tababarka EQEL ee Sannadka 2aad. La soco, tafaasiil dheeraad ah oo ku saabsan tababarkan ayaa dhawaan la wadaagi doonaa.



# Cusboonaysiin Laba Luuqadle ah



## Laba Luuqadood iyo Xeerka Caruurta ee Billow Cadaalad Leh

Iyada oo la ansixiyay Fair Start for Kids Act, maalgelin dheeraad ah ayaa la bixiyay si loo taageero shaqada labada luuqadood ee goobaha waxbarashada hore. Waa kuwan qaar ka mid ah cusboonaysiinta shaqada aan qabanay:

- Taageer oo horumari barnaamijyada barashada hore ee labada luuqadood ee bixiyayaasha ruqsada haysta ama la xaqiijiyay.
- DCYF waxay soo ururisay kooxaha barashada hore ee gudaha si ay u dejiyaan hadafyada iyo mudnaanaha si shaqadan loo bilaabo.
- Waxaa la samaynayaa koox la talin ah oo laba luqadle ah oo kulmi doona jiilaalkaan.
- Koox la taliyayaal Qabiil ah ayaa loo sameynayaa inay istaraatiijiyad u mariyaan waddooyinka qabiilada ee ku wajahan magacaabis laba luqadle, iyo tababar DL qabiileed oo gaar ah.

## Cusboonaysiinta Laba Luuqadle ah

- Tababbarka Bartaha Labada Luqadood waxaa loo cusboonaysiiyaa hab isku dhafan. Taas macnaheedu waa in ka qaybgalayaasha tababarku ay si gaar ah u heli karaan waxa ku jira oo ay hawlahooda u dhammaystiri karaan waqtigooda laakiin weli waxay lahaan doonaan awood ay ku biiri karaan wadahadalada kooxaha yaryar. Habkan cusub wuxuu noqon doonaa mid lagu daro tababbarka aan hadda bixinno, kaas oo ah mid toos ah oo la taaban karo.
- Waxaan ku guda jirnaa ballaarinta bixiyeyaashayada tababarka. Tani waxay ka dhigan tahay ururo tababarro badan iyo tababarayaal ayaa la heli doonaa si ay tababarkan u siiyaan bixiyeyaal badan.

Miyaad qabtaa su'aalo ku saabsan shaqadan ama ma jeclaan lahayd inaad ka qayb qaadato? La xiriir Athena Jiménez-Manalo.

---

# Aasaaska Daryeelka Ilmaha oo Bilaash ah



Ma raadinaysaa dhammaystirka koorsada Aasaaska Daryeelka Ilmaha? Aasaaska Daryeelka Ilmaha ee bilaashka ah ayaa la heli karaa! Eeg oo hoos iska diiwaangeli.

Is Diiwaangeli

---

# Laga Billabo Beerta illa Daryeelka Hore & Waxbarashada



Beerta illaa Bulshada ECE ee Tababarka waa shabakad beeraley ah, bixiyeyaal, barnaamijyo, iyo kuwo kale oo danaynaya barashada beeraha illaa ECE ee Gobolka Washington

**Wax Badan oo Ku Saabsan Beerta illaa ECE**

Waaxda Sharci Dejinta Gobolka Washington (Washington State Legislature) waxay siisay heerar maaliyadeed oo taariikhi ah Waaxda Beeraha ee Gobolka Washington oo loogu talagalay dadaallada nidaamyada cuntada ee kala duwan ee kalfadhiga Sharci dejinta ee 2021-ka ee Miisaaniyadda Gobolka 2021-23, oo ay ku jirto **$5 milyan si loo ballaariyo iibsashada maxalliga ah ee barnaamijyada nafaqada carruurta ee Gobolka Washington.** Deeqaha cusub ee ka imanaya miisaaniyaddan ayaa dib u bixin doona barnaamijyada nafaqada carruurta ee dugsiyada degmada, xarumaha daryeelka carruurta, iyo barnaamijyada cuntada xagaaga si loogu iibsado cuntada Washington lagu beero. Si aad wax badan u ogaato, booqo:

Shaqabaka WA ee Beerta illaa Dugsiga

---

# Codsiga Deeqda Xasilinta Daryeelka Carruurta Hadda Waa La Heli Karaa

DCYF waxay ku faraxsan tahay inay ku dhawaaqdo in codsiga Deeqda Xasilinta Daryeelka Carruurta hadda la heli karo. Bixiyeyaasha xanaanada caruurta ee ruqsada iyo shahaadada haysta ayaa ka dalban kara Deeqda Xasilinta Daryeelka Ilmaha ee Bogga Daryeel Bixiyaha ee Xarunta WA. **Codsiga ayaa hadda furan wuxuuna xirmi doonaa 11:59 habeennimo marka la gaaro Juun 30, 2022.**

## Caawimaad Ma Uga Baahan Tahay Dalbashada Deeqada? Caawinaad Farsamo Ayaa La Heli Karaa!



Caawimada Farsamada (Technical Assistance, TA) waxay halkan u joogtaa inay ka caawiso bixiyeyaasha inay codsadaan Deeqda Xasilinta Daryeelka Carruurta, inay fahmaan sida maalgelinta loo adeegsan karo iyo sida diiwaannada loo hayo. TA waxay bixisaa:

- Caawimaad qof-ka-qof ah
- Waxbarsho kooxo yar

- Caawimaad toos ah, dhanka taleefanka, ama dhanka onlaaynka (sida, Zoom)
- Caawinta luqadda koowaad ee bixiyaha (Turjumaanno ayaa la isticmaali karaa haddii loo baahdo)
- Ku taageerida farsamada, oo ay ka mid tahay marin u helka iyo raadinta Bogga Daryeel Bixiyayaasha ee Xarunta WA
- Wuxuu daryeek bixiyeyaasha ku xiraa ilaha macluumaadka

## Is diwaangeli!

The Imagine Institute iyo Voices of Tomorrowayaa ayaa bixin doona bixiyeyaasha TA.

| The Imagine Institute | Voices of Tomorrow |
|---|---|
| **Websaaydka**: imaginewa.org/CCSG-Support | **Websaaydka**: voicesoftomorrow.net |
| **Taleefanka**: (206) 492-5249 | **Taleefanka**: (206) 278-8290 |
| **Iimaylka**: CSSG@imaginewa.org | **Iimaylka**: childcaresupport@tomorrowvoices.org |
| **Luuqadaha**: Korean, Amharic, Tigrinya, Carabi, Soomaali, Isbaanish, Ingiriis, iyo kuwo kale oo badan | **Languages**: Soomaali, Oromo, Amharic, Tigrinya, Swahili, Carabi, iyo Ingiriis |

Macluumaad dheeri ah oo ku saabsan Deeqda Xasilinta Daryeelka Carruurta, booqo:

- Bogga Deeqda Xasilinta Daryeelka Carruurta ee DCYF
- Siminraarada dhowaan la duubay ee ku saabsan Deeqda Xasilinta Daryeelka Carruurta

---

# Barnaamijka Tababarayaasha iyo Tababarka ee Dawladdu Ansixisay



Ma waxaad tahay tababare ama ma xiisaynaysaa inaad wax badan ka ogaato barnaamijka Tababbarka ee Dowladdu Ansixisey ee Washington? Wargeyska Kobcinta Shaqaalaha ee ugu dambeeyay wuxuu ku wajahanaa Tababarayaasha Dawladdu Ansixisay.

Liiska dhammaystiran ee Wargeyska Kobcinta Shaqaalaha waxaa laga heli karaa Bogga Warsidaha iyo Siminaarada ee DCYF:

Warsidayaasha iyo Siminaarada

---

# Taxanaha Siminaarka Dayrta



Ku Soo Biir Taxanaha Siminaarka Dayrta ee PD Taxanaha ayaa dabooli doona mowduucyo kala duwan oo ku saabsan agabyada, la kulan OOo salaan, iyo bilowga PACE. Waxaan rajaynaynaa inaan halkaas kugu aragno!

---

## Nofeembar: La kulan oo Salaan iyo Isdhaafsiga Nooca Cuntada!



Xilligan dayrta, kooxda PD waxay rabaan inay martigeliyaan siminaar madadaalo leh oo aan caadi ahayn si ay uga maqlaan goobta oo ay isku dhaafsadaan nooca cuntada!

Siminaarkan ayaa yeelan doona turjubaanno lagu heli karo Isbaanish iyo Soomaali. Inta lagu guda jiro siminaarka waxaa:

- Sameeyn doonnaa la kulan oo salaan ee degdeg ah oo ku saabsan kooxda PD.
- Dhagaysan doonnaa ka soo qaybgalayaasha. Xaqiiqdii waxaan doonaynaa inaan ogaano:
    - Waxaa maankaaga ku jira?
    - Halka taageero looga baahan yahay?
- La Wadaagi Doonaa Nooca Cuntooyinka: soo qaado cuntada aad jeceshahay waaana wadaagi doonno inta lagu jiro siminaarka, ama dhanka qaybta wadasheekaysiga. Waxaan soo ururin doonnaa dhammaan cuntooyinka la wadaago waxaanna abuuri doonnaa buug noocyo cunto karis ah oo loo diri doono dhammaan ka qaybgalayaasha taariikh dambe.

### Talaado, Nofembar. 16 | 6 fiidnimo

Halkan Iska Diiwaangeli

***Fiiro Gaar ah**: Siminaarkan wuxuu u furan yahay qof walba wadaagista nooca cuntadana waa ikhtiyaar. Haddii aadan samayn karin siminaarkan laakiin aad jeclaan lahayd inaad wadaagto cuntada aad jeceshahay ama aad hesho buugga cuntada, iimayl u dir Marlene White.*

---

## Disembar: Daahfurka PACE



PACE wuu bilaabmayaa! DCYF waxay isu diyaarineysaa inay bilowdo PACE horaanta 2022 waxaana rabnaa inaan hubinno inaad la socotid ikhtiyaarkan.

PACE (Wax U Dhigma Bulshada Uu Daryeel Bixiyaha Gaari Karo), oo hore loogu yiqiinay qaabka Tababarka Ku saleysan Bulshada, ayaa ah mid ka mid ah ikhtiyaarrada si aad u buuxiso shardigaaga waxbarasho ee ruqsadda oo loogu talagalay kuwa loo baahan yahay inay haystaan shahaado hore ama gaaban.

Nagu soo biir inta lagu jiro siminaarkan si aad wax u barato:

- Haddii ikhtiyaarkani kugu habboon yahay.
- Sida loo helo tababarada PACE.
- Sida CCB iyo EQEL ay ugu habboon yihiin PACE.
- Sida ay PACE ugu xirnaan doonto fursado waxbarasho oo dheeraad ah.

### Talaado, Diseembar 14 | 6 fiidnimo

Halkan Iska Diiwaangeli

---

## Miyaad Seegtay Siminaarkii Oktoobar?



Siminaarka Oktoobar, Maareynta Xisaabta MERIT, waxaa loogu talagalay inay kaa caawiso maareynta aasaaska xisaabtaada MERIT iyadoo diiradda la saarayo xaqiijinta waxbarashada iyo tababarka.

Siminaarada had iyo jeer waa la duubaa waxaana laga heli karaa boggeena Newsletters and Webinars (Warsidayaasha iyo Siminaarada).

*Haddii aadan heli karin siminaarka aad raadineyso, waxay u badan tahay inaan ka shaqeyneyno inaan duubno oo aan soo galino. Waan kaaga mahadcelineynaa samirkaaga. Haddii aad qabtid su'aalo ku saabsan siminaar gaar ah, iimayl u dir Marlene White.*

---

# Waxbarasho Ku Taageerida Xoogga Shaqada ee ECE



DCYF way taqaanaa qiimaha waxbarashada waxayna si taxadar leh ula shaqaysaa si ay iskaashi ula yeelato bulshada tacliinta sare si loo naqshadeeyo loona bixiyo barnaamijyo waxbarasho iyo deeqo waxbarasho oo kala duwan si ay u taageeraan shaqaalaha waxbarashada hore. Si aad ula socotid barnaamijyadan iyo ilaha kale ee waxbarashada, booqo

Deeqaha waxbarasho, Dhiirigelin, iyo Abaalmarinno

---

## Hagida Barnaamijka Deeqda Waxbarasho ee DCYF

Miyaad qabtaa su'aalo ama ma u baahan tahay caddeyn ku saabsan barnaamijyada deeqda waxbarasho ee DCYF?



Hagida Barnaamijka Deeqda Waxbarasho ee DCYF  ee Deeqda Early Achievers iyo Deeqaha Waxbarasho ee Wacyigelinta Daryeelka Carruurta ee Washington waxaa loo heli karaa onlayn ahaan: Hagida Barnaamijka Deeqda Waxbarasho ee DCYF.

*Ma rabtaa inaad waxbadan ka ogaato deeqaha waxbarasho? Fiiri xulashooyinka aad heli kartid: Deeqaha Waxbarasho ee Waxbarashada hore.*

---

## Deeqda Waxbarashada ee Early Achievers: Sheekooyinka Guusha

### Sheekada Marie

*Xirfad ahaan ahaan, deeqda Early Achievers ee aan helay aad bay muhiim u tahay. Gaar ahaan, sidii aan hore ula hadli jiray waalidiinta iyo carruurta aad bay u kala duwanayd. Waa inaan kuu sharxaa oo aan ku ogeysiiyaa in deeqda la'aanteed, aanan awoodi doonin inaan ku xirnaado waalidiinta iyo carruurta sida aan*

*maanta ahay.*
-Marie

## Sheekada Nathalia



*Haye, magacayga waa Nathalia Z. Waxaan qalin jebin doonaa bisha Juun. Waxaan la shaqeynayay carruur tan iyo 2018-kii waxaanan bilaabay Shahaada Jaamacada Ka Hor ee (Associate in Arts, AA) gugii 2019. Waxaan ku qasbanaa inaan joojiyo waxbarashadayda ka hor intaanan ogaanin deeqda waxbarasho ee Early Achievers sababtoo ah aniga iyo waalidkayba ma awoodin inaan wax ka barto kulliyaddayda, sidaa darteed waa inaan xoogga saaraa shaqada iyo helidda lacag si aan mar kale dugsiga u bilaabo.*

*Ka dib markii aan wareystay dugsiga barbaarinta oo ay ii sheegeen deeqdan waxbarasho, waxaan codsaday isla markii aan shaqada helay. Waxay ii ahayd duco ogaanshaha in riyadeyda ah inaan ka qalin jebiyo kulliyad ku taal Mareykankana ay aad ugu dhowdahay inay rumowdo waxay ka dhigeysaa wax walba sixir, gaar ahaan maxaa yeelay ma aanan bixin lacag toos ah tan iyo markii aan bilaabay barnaamijkan .*

*Sannado ka hor, waxaan doonayay inaan ku biiro xayaysiiska, laakiin qalbigaygu had iyo jeer wuxuu la jiray carruurta. Imaatinka Lake Washington Tech ayaa iga dhigtay mid aad u koraysa ma aha oo kaliya xirfad ahaan laakiin sida naag reer Colombia ah oo doonaysa inay ku gaadho riyooyin waaweyn nolosheeda. Waxaan bilaabay barnaamijkan anigoo wax yar ka og daryeelka iyo ku talagalnimada carruurta oo laba sano ka dib waxaan arki karaa horumarkeyga iyo sida aan u qabto doorkayga macallin ahaan. Deeqdan waxbarasho ayaa noloshayda u furtay albaab aad u weyn oo aan ogahay in arday badan oo kale u baahan yihiin.*

## Sheekada Ushas

*Maalgelinta Early Achievers ayaa runtii iga caawisay inaan barto waxyaabo badan oo cusub oo ku saabsan la shaqaynta carruurta iyo fahamka horumarkooda. Waxaan bartay farsamooyin cusub oo ku saabsan sida carruurta loo baro sida qofka markiisa uga qaybqaato, loo qiimeeyo loona fahmo kala duwanaanshaha fasalka dhexdiisa, una muujiyaan shucuurtooda. Waxa kale oo aan bartay aagag horumarineed oo kala duwan iyo sida shaqaalaha daryeelka carruurtu uga caawin karaan carruurta meelahaas. Tusaale ahaan, waxaan ka bartay horumarinta garashada iyo waxqabadyo kala duwan oo aan u horseedi karo inay taageeraan koritaanka garashada ilmaha. Waxaan rumeysanahay inay muhiim tahay in la sii wado maalgelinta deeqda waxbarasho mustaqbalka maxaa yeelay waxay u oggolaaneysaa macallimiinta inay helaan xirfado dheeri ah oo ka caawiya inay noqdaan macallimiin wanaagsan, iyadoon wax culeys dhaqaale ah ama cadaadis ah dareemin.*
-Usha B.

## Sheekada Haylee

*Markii aan koray, waxaan la kulmay nolol guri oo adag oo aan xasilloonayn oo u dhowwyd darbi-jiifnimo iyo welwel soo noqnoqday oo igu habsaday. Way igu adkayd inaan arko walaalahay oo koray oo u dhibaataysan siyaabo u gaar ah aniga oo dhinac jooga, taasina waxay iga dhigtay inaan u wanaagsanaado iyaga iyo carruurta kale ee bulshadeyda oo laga yaabo inay la halgamayaan. Waxaan ka bilaabay iskaa wax u qabso kaniisadeyda aniga oo jira 10 ama 11 jir. Waxaan ku koray xiisaha aan u qabo waxbarista anigoo kaashanaya*

*laba haween oo ku dayasho mudan, way i bilaabeen. Markii aan gaaray da'da 14 ama 15 ayaan keligay hoggaaminayey fasal carruur ah waxaanan qaatay cashar kasta oo hoggaamineed oo dugsigayga sare bixiyo anigoo rajaynaya inaan kobciyo xirfadda mustaqbalka ee aan ogaa inaan dooran doono. Daryeelka carruurta ayaa ii keenay nabad aad u badan markaan dareemay in noloshaydu ay isbeddel samaynayso iyo inaan abuuro mustaqbal wanaagsan oo daryeel leh. Isla markii aan dhammaystay qalin jabinta dugsiga sare, waxaa la ii soo bandhigay shaqo xarunta caruurta aan dugisga gaarin iyo daryeelka carruurta. Tababarahayga iyo saaxibadayda ayaa markhaati iiga ahaa fasalkayga iskaa wax u qabsaga ahaa, waxayna aragtay xiisaha aan u qabo waxbaridda iyo sidoo kale kartidayda.*



*Markii aan bilaabay horyaallada waaweyn (haha), waxaan bilaabay wax yar oo waxaana wax baray fasalka dhallaanka taas oo ahayd farxad buuxda! Wax yar ka dib waxaan u dhaqaaqay fasallada socod baradka, ka dibna waxaan ugu dambayntii meel ka qaatay qaybta caruurta aan dugsiga gaarin. Taasi oo dhan waxay dhacday ku dhawaad afar sano ka hor, waxayse ahayd safar cajiib ah. Waxaan la wadaagay qosol, oohin, arrimo adag, heeso, dhacdooyin muhiim ah, iyo wax cusub bilaabid oo aan la yeeshay carruurtayda iyo kooxdayda haweenka ee u heellan hawsha. Marna ma ilaawi doono.*

*Waxaan leeyahay xamaasad, waxaan leeyahay khibrad, waxaan leeyahay u heellannaan, markaa maxaa iga maqnaa? Jawaabta su'aashaasi waxay noqon doontaa waxbarasho. Waxaan u baahday waxbarasho kulliyadeed si aan u siiyo carruurtan waxbarashada hore ee ugu fiican ee suurtogalka ah. Waxaan u baahday inaan ogaado sida wax loo baro hab dib ugu laabanaya hadafkaygii ahaa inaan carruurta siiyo daryeel iyaga taageeri kara, in kasta oo ay soo mareen waayo aragnimadooda carruurnimo ee xun. Kulliyaddu marna uma dareemin inay ii tahay waddo fudud ama ikhtiyaar, laakiin waxaan ka maqlay barnaamij ka socda xaruntayda oo la yiraahdo Early Achievers, kaas oo i siin doona waxbarashada loo baahan yahay si aan u maal geliyo kobcinta waxbarashadayda ee aan aad u jeclaa.*

*Tan iyo markii aan bilaabay casharradayda aniga oo kaashanaya Early Achievers, waxaa la i siiyay dhammaan agabyadii loo baahnaa si aan ugu guuleysto waxaana awooday in aan gaaro 3.97 GPA! Gabi ahaanba waan ooyay markii aan arkay; waligeedna malaayiin sano markaan jiray 11 sano ma maleyn lahayn halk aan haada joogo, kulliyadda oo aan ka helay GPA sare, shaqo aan jeclahay, oo ku hareereysan taageero. Waxaan awooday inaan dib u habeeyo laba fasal oo ku yaal xaruntayda si aan si fiican ugu haboonaado baahida ardaydeena, wax badanna waan bartay si aan u taageero sida aan u baahanahay runtiina way muujinaysaa.*

***Barnaamijkan la'aantiis ma siin karin carruurtan waxa ay mudan yihiin Iyagu waa mustaqbalka, mustaqbalkeenna oo weli ma aanan dhammayn!***

---

## Nala Wadaag!




Miyaad heshay deeqda Early Achievers oo ma rabtaa inaad wadaagto sheekadaada? U dir sheekadaada Khabiirka Waxbarashada ECE, Sharene Leek, si loogu qoro warsidaha xiga.

---

# Ka Qaybgalka Bulshada ee DCYF

Kooxda Ka qaybgalka Bulshada ee DCYF waxay bixisaa kormeer iyo taageerada la shaqeynta daneeyayaasha dibadda iyo hay'adaha la talinta si loo hubiyo in xiriir joogto ah oo wax ku ool ah uu ka dhexeeyo xubnaha iyo hay'adda.

Ka Qaybgal!

DCYF waxay leedahay fursado badan si loo hubiyo in codkaaga la maqlo. Qaar waxaa ka mid ah:

- Golaha La talinta Waxbarashada Hore
- Daryeel Bixiye Taageera Guddi Hoosaadyada
- Iyo wax intaas ka sii badan!

Si aad u hesho liis buuxa oo ah guddiyada la talinta iyo goleyaasha ama si aad uga qayb qaadato, Bogga Hawlgalka Bulshada ee DCYF.

---

# Cusboonaysiinta Qabiileed




Ma ogtahay in DCYF ay leedahay Xafiiska Xiriirka Qabiilka?

- Aqri warsidahooda ugu dambeeyey

DCYF waxay bixisaa mawduucyo kala duwan oo la rukunto. Fiiri mawduucyada kala duwan oo la rukunto.

---

# Calaamadayso Bogga Horumarinta Xirfadeed

Ha moogaanin wararka ugu dambeeyay ee la xiriira tababarka iyo Horumarka Xirfadeed. Calaamadayso bogga Horumarinta Xirfadeed!

Calaamadayso Bogga PD

---

# Rukumo Warsidaha PD

*Kobcinta Shaqaalaha* waa macluumaad loogu talagalay dhammaan shaqsiyaadka ku jira ganacsiga taageerooyinka barashada xirfadda shaqaalaha oo siinaya shaqaalaha waxbarashada hore.

*Warsidaha PD* waxaa loogu talagalay in bulshada barashada hore ee Washington la la socodsiiyo dhammaan shaqada weyn ee ku saabsan Horumarinta Xirfadeed.

Rukumo

*Liis dhammaystiran oo wargeysyada ah ayaa laga heli karaa boggeena Newsletters and Webinars (Warsidayaasha iyo Siminaarada).*

## Farriimo laga helay Xoghaynta DCYF



Xoghayaha DCYF Ross Hunter wuxuu wadaagaa farriimaha billaha ah si uu u bixiyo cusboonaysiinta iyo wararka ku saabsan shaqada wakaaladda. Hoos ka akhriso fariimihiisii ugu dambeeyay oo guji halkan si aad u rukumato.

- Warsidaha Oktoobar
- Warsidaha Sibteembar
- Warsidaha Ogosto

Haddii aad qabtid wax su'aalo ah ama faallooyin ah, fadlan la xiriir Xafiiska Isgaarsiinta DCYF.

## Sidee Nahay?



Fadlan nala soo socodsii sida aan nahay adigoo ka qayb qaadanayo sahankan degdegga ah ee saddexda su'aalood.

Haddii aad qabtid wax su'aalo ah ama soo jeedin mawduuc ah la xiriir Marlene White.